

Waa Nuqul Dawli ah – lama iibin karo


JAMHUURIYADDA		SOMALILAND
FAAFINTA RASMIGA AH		
SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE	النشرة الرسمية لجمهورية صوماليلاند	
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL, HARGEYSA E-mail: Garyaqaankaquud@gmail.com		
Sanadka: 5aad	Cadadka: 12aad ee December	Taariikh: 02/01/2016
QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.		
RUKUNKA (Subscription):		
QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii Boggii kastaaba SL. Sh.		

TUSMADA CADADKA

<u>QAYBTA KOWAAD:</u> XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA:	
1) <i>Sooma Bixin</i>	
<u>QAYBTA LABAAD:</u> XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:	
2) <u>Wareegto Madaxweyne,</u> Sii-hayn Xil Ku-meel-gaadh ah,	594
3) <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0555/122015</u> Magacaabid	595
4) <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0556/122015</u> Magacaabid	596

5) <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0560/122015</u> Magacaabid	597
6) <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0558/122015</u> Beddel	598
7) <u>XEER MADAXWEYNE, Xil-ka Qaadis</u>	599
8) <u>XEER MADAXWEYNE, Xil-ka Qaadis</u>	600
9) <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0557/122015</u> Magacaabid	601
10) <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0554/122015</u> Beddel	603
11) <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0561/122015</u> Magacaabid	604
12) <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0559/122015</u> Beddel	605
13) <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0560/122015</u> Beddel	606
14) <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0561/122015</u> Beddel	607
15) <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0562/122015</u> Magacaabid	608
16) <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0563/122015</u> Magacaabid	609
17) <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0564/122015</u> Magacaabid	611
18) <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0565/122015</u> Magacaabid	612
19) <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0566/122015</u> Magacaabid	613
20) <u>XEER MADAXWEYNE, Xil-ka Qaadis</u>	614
21) <u>XEER MADAXWEYNE, Xil-ka Qaadis</u>	615

22) <u>XEER MADAXWEYNE</u> , Xil-ka Qaadis	616
23) <u>XEER MADAXWEYNE</u> , Xil-ka Qaadis	617
24) <u>XEER MADAXWEYNE Lr:</u> <u>00567/122015</u> Magacaabid	618
25) <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0568/122015</u> Magacaabid	619
26) <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0569/122015</u> Magacaabid	620
<u>QAYBTA SADEXAAD: DIGREETOYINKA,</u>	
WAREEGTOOYINKA, AMARADA &	
XEERNIDAAMIYAYAASHA WASIIRADA, IWM	
27) Dhaqan Gelin Degreeto Madaxweyne, Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud Guryeynta & Gaadiidka	621
<u>QAYBTA AFRAAD: AMARADA &</u>	
<u>GO'AANADA MAAMUL</u>	
28) Amar Xayiraad Beer dhaxal ah <u>Maxkamada Degmadda, Hargeysda</u>	623
29) Amar Xayiraad Guri <u>Maxkamada Degmadda, Hargeysda</u>	625
30) Xayiraad Beer <u>Maxkamada Gobolka M. Jeex</u>	627
31) Faafin Xukun, <u>Maxkamadda Degmada Hargeysa</u>	631
32) Diiwaan Gelin Shirikada Al-Jawdah Company <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	637
33) Diiwaan Gelin Shirikada Lusidle Clearance Transport and Logistic co	



<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	
34) Diiwaan Gelin Shirikada Somaliland Hanti Jire Accounting Consultancy	637
<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	
35) Diiwaan Gelin Shirikada Deero Electronics	639
<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	
36) Diiwaan Gelin Shirikada Pc for General Construction & Engineering Company	641
<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	
37) Diiwaan Gelin Shirikada United Consultants for Development (UCD)	642
<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	
38) Diiwaan Gelin Shirikada Ashari Doors Company	644
<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	
39) Diiwaan Gelin Shirikada Somalibay PLC	645
<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	
40) Diiwaan Gelin Shirikada Safwa Export Comapany	647
<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	
	649
<u>QAYBTA SHANAAD: OGEYSIISYADA</u>	
<i>Sooma bixin</i>	

QAYBTA LABAAD:

XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO

DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:

REPUBLIC OF  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT



- Ku: Mudane, Cabdi-samad Cumar Maa
Hargeysa
- Og: Wasaaraddaha Dawladda
Hargeysa
- Og: Hay'adaha Madaxa-bannaan ee Dawladda
Hargeysa
- Og: Golaha Wakiillada
Hargeysa
- Og: Golaha Guurtida
Hargeysa
- Og: Guddoomiyaha Maxkamadda Sare
Hargeysa
- Og: Madaxweyne Ku-xigeenka
Hargeysa
- Og: Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Qaranka
Hargeysa

Ujeeddo: Sii-hayn Xil Ku-meel-gaadh ah

Mudane,

Sida aad la socoto, waxaan in muddo ah fasax waxbarasho u ogolaaday Garyaqaanka Guud ee Qaranka. Haddaba, waxa lagama-maarmaan noqotay in jagada Garyaqaanka Guud si-ku-meel-gaadh ah loo buuxiyo.

Sidaas darteed, waxaan go'aamiyey inaad xilka Garyaqaanka Guud ee Qaranka si-ku-meel-gaadh ah u sii hayso.



Waxaan kaa rajaynayaa inaad xilkaas u gudan doonto si xil-kasnimo leh.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  **SOMALILAND**
THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3721/122015

DATE....22/12/15

XEER MADAXWEYNE Lr: 0555/122015

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;


Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay Guddoomiyayaasha Gobolladu u leeyihiin Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Guddoomiyaha Gobolka sellel;

Markuu La Tashaday: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

Markuu Arkay: In uu hanan karo, aqoon iyo kartina u leeyahay jagadan;



Wuxuu Go'aansaday

In Mudane, Farxaan Xassan Cabdi, laga bilaabo taariikhda manta uu ahaado Guddoomiyaha Gobolka sellel ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3722/122015

DATE....22/12/15

XEER MADAXWEYNE Lr: 0556/122015

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa
(3)aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay La-taliyayaasha
Madaxweynuhu u leeyihiin Dalka
iyo Dhismaha Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta
jagadan;

Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo
hufnaantiisa shaqo;

Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo xilkan;

Wuxuu Go'aansaday

In Mudane, Cabdillahi Cabdi Xaaji Cumar (Cabdillahi jawaan), laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado La-taliyaha Madaxweynaha ee Arrimaha Doorashooyinka Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,


Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3723/122015

DATE....22/12/15



Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa (3)aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay La-taliyayaasha Madaxweynuhu u leeyihiin Dalka iyo Dhismaha Qaranka;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagadan;
- Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;
- Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo xilkan;

Wuxuu Go'aansaday

In Mudane, Cawil Cali Ducaale, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado La-taliyaha Madaxweynaha ee Ictiraaf Raadinta iyo Arrimaha Wada-hadallada Jamhuuriyadda Somaliland iyo Somaliya.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT



JSL/M/XERM/249-3724/122015

DATE....22/12/15

XEER MADAXWEYNE Lr: 0558/122015

Beddel

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa
(3)aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay La-taliyayaasha
Madaxweynuhu u leeyihiin Dalka
iyo Dhismaha Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta
jagadan;

Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo
hufnaantiisa shaqo;

Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo xilkan;

Wuxuu Go'aansaday

In Mudane, Fahmi Cabdi Bidaar, laga bilaabo taariikhda
maanta uu ahaado La-taliyaha Madaxweynaha ee Arrimaha
Hay'addaha Caalamiga ah iyo Kuwa Maxaliga Ah.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



REPUBLIC OF  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3727/122015

DATE....22/12/15

**Ku: Mudane, Cali Cawil Cabdi
Oodweyne
Guddoomiyihii Hore ee Gobolka
Daadmadheedh**

**Og: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha
Hargeysa**

Ujeedo: Xil Ka-qaadis

Mudane,

Waxa kaaga mahadinayaa mudadii aad soo haysay xilka Guddoomiyaha Gobolka Daadmadheedh. Xilalka Qaranka ayey dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.

Sidaa darteed, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Guddoomiyaha Gobolka Daadmadheedh ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Haddaba, waxaan kaa rajaynayaa in si niyad sami ah aad ugu wareejiso xilka aad haysay Mudane, Axmed Maxamed Xaashi, oo aan xilkaa isaga ah u magacaabay.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3728/122015

DATE....22/12/15

**Ku: Mudane, Cabdirisaaq Waaberi Rooble
Saylac
Guddoomiyihii Hore ee Gobolka Sellel**

**Og: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha
Hargeysa**

Ujeedo: Xil Ka-qaadis

Mudane,

Waxa kaaga mahadinayaa mudadii aad soo haysay xilka Guddoomiyaha Gobolka Sellel. Xilalka Qaranka ayey dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.



Sidaa darteed, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Guddoomiyaha Gobolka Sellel ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Haddaba, waxaan kaa rajaynayaa in si niyad sami ah aad ugu wareejiso xilka aad haysay Mudane, Farxaan Xassan Cabdi oo aan xilkaa isaga ah u magacaabay.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3729/122015

DATE....22/12/15

XEER MADAXWEYNE Lr: 0557/122015

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tix-geliyay: Ahmiyadda ay Guddoomiyayaasha Gobolladu u leeyihiin Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Guddoomiyaha Gobolka Daadmadheedh;

Markuu La Tashaday: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

Markuu Arkay: In uu hanan karo, aqoon iyo kartina u leeyahay jagadan;

Wuxuu Go'aansaday

In Mudane, Axmed Maxamed Xaashi, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Guddoomiyaha Gobolka Daadmadheedh ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3730/122015

DATE....22/12/15



Beddel

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tix-geliyay: Ahmiyadda ay Guddoomiyayaasha Gobolladu u leeyihiin Qaranka;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Guddoomiyaha Gobolka Togdheer;
- Markuu La Tashaday: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha;
- Markuu Arkay: In uu hanan karo, aqoon iyo kartina u leeyahay jagadan;

Wuxuu Go'aansaday

In Mudane, Maxamed Ibraahin Aadan (Qabo), laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Guddoomiyaha Gobolka Togdheer ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF SOMALILAND



THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3731/122015

DATE....22/12/15

XEER MADAXWEYNE Lr: 0561/122015

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tix-geliyay: Ahmiyadda ay Guddoomiyayaasha Gobolladu u leeyihiin Qaranka;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Guddoomiyaha Gobolka Saaxil;
- Markuu La Tashaday: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha;
- Markuu Arkay: In uu hanan karo, aqoon iyo kartina u leeyahay jagadan;

Wuxuu Go'aansaday

In Mudane, Jaamac Yuusuf Axmed, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Guddoomiyaha Gobolka Saaxil ee Jamhuuriyadda Somaliland.



Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3733/122015

DATE....22/12/15

XEER MADAXWEYNE Lr: 0559/122015

Beddel

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad, Xarafka (Kh) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay Agaasimayaasha Guud ee Wasaaraduhu u leeyihiin dhismaha Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Ganacsiga iyo


Maalgashiga Caalamiga ah ee
JSL;

Markuu La Tashaday:

Madaxda ay khusayso;

Markuu Ku Qancay:

In uu hanan karo, aqoon iyo
kartina u leeyahay jagadan;



Wuxuu Go'aansaday

In Mudane, Cabdi-rashiid Axmed Guuleed, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Ganacsiga iyo Maalgashiga Caalamiga ah ee JSL.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3734/122015

DATE....22/12/15

XEER MADAXWEYNE Lr: 0560/122015

Beddel

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad, Xarafka (Kh) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay Agaasimayaasha Guud u leeyihiin Dhismaha Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Agaasimaha Guud ee Komishanka Maamul Wanaagga ee JSL;

Markuu La Tashaday: Madaxda ay khusayso;

Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo, aqoon iyo kartina u leeyahay jagadan;

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Maxamed Sheekh Cumar Hassan, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Komishanka Maamul Wanaagga ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3735/122015

DATE....22/12/15

XEER MADAXWEYNE Lr: 0561/122015

Beddel



Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad, Xarafka (Kh) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay Agaasimayaasha Guud ee Wasaaraduhu u leeyihiin dhismaha Qaranka;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorshaynta Qaranka iyo Horumarinta ee JSL;
- Markuu La Tashaday: Madaxda ay khusayso;
- Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo, aqoon iyo kartina u leeyahay jagadan;

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Hassan Cumar Hoori, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta Qaranka iyo Horumarinta ee JSL.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE Lr: 0562/122015



Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad, Xarafka (Kh) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay Agaasimayaasha Guud ee Wasaaraduhu u leeyihiin dhismaha Qaranka;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Dib-u-dejinta ee JSL;
- Markuu La Tashaday: Madaxda ay khusayso;
- Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo, aqoon iyo kartina u leeyahay jagadan;

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Cabdi-naasir X. Daa'uud Warsame, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Dib-u-dejinta ee JSL.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT



JSL/M/XERM/249-3737/122015

DATE....22/12/15

XEER MADAXWEYNE Lr: 0563/122015

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 12aad, faqradiisa 7aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 19aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay Agaasimayaasha Guud u leeyihiin dhismaha Qaranka;
- Markuu helay: Qoraalka Talada Wasiirka Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta;
- Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo xilkan;

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Shariif Ibraahim Cumar, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Xafiiska Diiwaanka Sekada Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



REPUBLIC OF  SOMALILAND
THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3738/122015

DATE....22/12/15

XEER MADAXWEYNE Lr: 0564/122015

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqadiisa 3aad, Xarafka (kh) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda ay Agaasimayaasha Guud ee Wasaaraduhu u leeyihiin Dhismaha Qaranka;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Agaasimaha Guud ee Wasaraadda Diinta iyo Awqafta ee JSL;
- Markuu La Tashaday: Madaxda ay khusayso;

Markuu Ku Qancay:

In uu hanan karo, aqoon iyo
kartina u leeyahay jagadan,



Wuxuu Go'aansaday

In Mudane, Saleebaan Siciid Cali, laga bilaabo taariikhda
maanta uu ahaado Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Diinta
iyo Awqaafta ee JSL.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3739/122015

DATE....22/12/15

XEER MADAXWEYNE Lr: 0565/122015

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay:

Qodobka 90aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay:

In baahi loo qabo buuxinta
jagada Maareeye Ku-xigeenka
Telefishanka Qaranka Madaxa

Bannaan ee Jamhuuriyadda
Somaliland;

Markuu Tixgeliyey:

Soo jeedimihii iyo talooyinkii
mas'uuliyiin kala duwan;

Markuu Ku Qancay:

In uu hanan karo, aqoon iyo
kartina u leeyahay jagadan;

Wuxuu Go'aansaday

In Mudane, Mustafe Maxamuud Qodax, laga bilaabo taariikhda
maanta uu ahaado Maareeye Ku-xigeenka Telefishanka
Qaranka Madaxa Bannaan ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3740/122015

DATE....22/12/15

XEER MADAXWEYNE Lr: 0566/122015

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay:

Qodobka 90^{aad}, Faqrdisa 3^{aad},
Xarafka (j) ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

- Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda ay Xubnaha Komishanka Maamul-wanaagu u leeyihiin Dhismaha Qaranka;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta Xubnaha Komishanka Maamul-wanaagga;
- Markuu ka Fiirsaday: Kartidooda, aqoontooda iyo hufnaantooda shaqo;
- Markuu Ku Qancay: In ay hanan karaan xilalkan loo magacaabay;

Wuxuu Go'aansaday

In Mudane, Mukhtaar Cismaan Cabdi, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado xubin ka tirsan Komishanka Maamul-wanaagga ee Jamhuuriyadda Somaliland.

In Mudane, Mukhtaar Yaasiin Cali, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado xubin ka tirsan Komishanka Maamul-wanaagga ee Jamhuuriyadda Somaliland.

In Mudane, Axmed Jaamac Maxamuud, laga bilaabo Taariikhda maanta uu ahaado xubin ka tirsan Komishanka Maamul-wanaagga ee Jamhuuriyadda Somaliland.

In Mudane Carab Nuur Xandulle, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado xubin ka tirsan Komishanka Maamul-wanaagga ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF



SOMALILAND

THE PRESIDENT



JSL/M/XILO/249/1-3741/122015

DATE....22/12/15

**Ku: Mudane, Qaasim Xasan Mataan
Maareeye ku-xigeenkii Hore ee TV-ga
Qaranka Hargeysa**

Ujeedo: Xil Ka-qaadis

Mudane,

Waxaan kaaga mahadinayaa mudadii aad soo haysay maareeye Ku-xigeenka TV-ga Qaranka Xilalka Qaranka ayey dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.

Sidaas darted, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka maareeye Ku-xigeenka TV-ga Qaranka ee Jamhuuriyadda Somaliland

Haddaba, waxaan kaa rajaynayaa in aad si niyad Sami ah ugu wareejiso xilka aad haysay mudane, Mustafe Maxamuud Qodax.oo aan xilkaa isaga ah u magcaabay

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT



JSL/M/XILO/249/1-3742/122015

DATE....22/12/15

Ku: Mudane, Xuseen Cabdilaahi Jaamac

Hargeysa

Guddoomiye ku-xigeenkii Hore

Komishanka Maamul

Wanaagga

Ujeedo: Xil Ka-qaadis

Mudane,

Waxaan kaaga mahadinayaa mudadii aad soo haysay Guddoomiye Ku-xigeenka Komishanka Maamul Wanaagga.

Sidaas darteed, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Guddoomiye Ku-xigeenka Komishanka Maamul Wanaagga ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT



JSL/M/XILO/249/1-3743/122015

DATE....22/12/15

Ku: Mudane, Ismaaciil Cabdi Xassan

Ceerigaabo

Guddoomiye ku-xigeenkii Hore ee

Gobolka Sanaag

Og: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha

Hargeysa

Ujeedo: Xil Ka-qaadis

Mudane,

Waxaan kaaga mahadinayaa mudadii aad soo haysay xilka Guddoomiye Ku-xigeenka Gobolka Sanaag. Xilalka Qaranka ayey dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.

Sidaas darteed, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Gudoomiye Ku-xigeenka Gobolka sanaag ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Haddaba, waxaan kaa rajaynayaa in aad si niyad sami ah ugu wereejiso xilka aad haysay Mudane, Naaleeye Axmed Sheekh Jaamac oo aan xilkaa isaga ah u magacaabay.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



REPUBLIC OF  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XILO/249/1-3744/122015

DATE....22/12/15

Ku: Mudane, Maxamed Jibriil Yoonis

Hargeysa

**Agaasimihii Guud ee Hore ee Wasaaradda
Dib-udejinta**

Ujeedo: Xil Ka-qaadis

Mudane,

Waxaan kaaga mahadinayaa mudadii aad soo haysay Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Dib-u-dejinta. Xilalka Qaranka ayey dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.

Sidaas darteed, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Dib-u-dejinta ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Haddaba, waxaan kaa rajaynayaa in aad si niyad sami ah ugu wereejiso xilka aad haysay Mudane, Cabdi-naasir X. Daa'uud Warsame oo aan xilkaa isaga ah u magacaabay.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



REPUBLIC OF  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3745/122015

DATE....22/12/15

XEER MADAXWEYNE Lr: 00567/122015

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda ay Guddoomiye ku-xigeenada Gobolladu u leeyihiin Qaranka;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Guddomiye ku-xigeenka Gobolka Buuhoodle;
- Markuu La Tashaday: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

Markuu Arkay:

In uu hanan karo, aqoon iyo
kartina u leeyahay jagadan

Wuxuu Go'aansaday

In Mudane, Jaamac Dheeg Cartan, laga bilaabo taariikhda
maanta uu ahaado Guddoomiye Ku-xigeenka Gobolka
Buuhoodle ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3746/122015

DATE....22/12/15

XEER MADAXWEYNE Lr: 0568/122015

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay:

Qodobka 90aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay:

Qodobka 110aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyey:

Ahmiyadda ay Guddoomiye ku-xigeenada Gobolladu u leeyihiin Qaranka;

Markuu Arkay:

In baahi loo qabo buuxinta jagada Guddomiye ku-xigeenka Gobolka Sanaag;

Markuu La Tashaday:

Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

Markuu Arkay:

In uu hanan karo, aqoon iyo kartina u leeyahay jagadan

Wuxuu Go'aansaday

In Mudane, Naaleeye Axmed Sheekh Jaamac, laga bilaabo Taariikhda maanta uu ahaado Guddoomiye Ku-xigeenka Gobolka Sanaag ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3747/122015

DATE....22/12/15

XEER MADAXWEYNE Lr: 0569/122015

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



- Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda ay Guddoomiye ku-xigeenada Gobolladu u leeyihiin Qaranka;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Guddomiye ku-xigeenka Gobolka Xaysimo;
- Markuu La Tashaday: Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha;
- Markuu Arkay: In uu hanan karo, aqoon iyo kartina u leeyahay jagadan

Wuxuu Go'aansaday

In Mudane, Jaamac Ciise X.Shaacuur, laga bilaabo Taariikhda maanta uu ahaado Guddoomiye Ku-xigeenka Gobolka Xaysimo ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

QAYBTA SADEXAAD:
DIKREETOYINKA, WAREEGTOOYINKA,
AMARADA & XEER NIDAAMIYAYAASHA
WASIIRADA, IWM:



REPUBLIC OF  *SOMALILAND*
JAMHUURIYADDA SOMALILAND

Ministry Of Public Works Wasaaradda Hawlaha Guud
Housing & Transport Guriyeynta & Gaadiidka

Xafiiska Wasiirka

Ref: WHG/G&G/XW/592/2015

Date: 20-12-2015

KU: Dhamaan Wasaaradaha Dawladda
KU: Dhamaan Hay'adaha Madaxa banana
KU: Xafiiska Hay'adaha Q/Midoobay kuwa
Caalamiga ah iyo kuwa goboleed

OG: Madaxweynaha JSL

Ujeeddo: Dhaqan Gelin Degreeto Madaxweyne:

Sida aad la socotaan Wasaaradda hawlaha Guud Guriyeynta & Gaadiidku waxay u xil saran tahay fulinta adeegyada danta guud oo ka mid ah waajibaadkeeda shaqo waana wasaarad farsamo oo gacanta ku haysa aqoontii fulineed ee hawlaha dhismaha oo ay ka mid yihiin (Engineeradii hore iyo kuwa hadda ka soo burqanaya jaamacadaha dalka

oo ay wasaaradani hoy u tahay lana rabo in la jiheeyo jiilkeena cusub ee soo bartay aqoonta Engineer-ka.

Sidaa awgeed, Madaxweynaha JSL isagoo ka duulaya arrimaha kor ku xusan isla markaana dhiiri galinaya Da'yarta dalkeena ee wax ku bartay gudaha dalka iyo dibadaba, wuxu soo saaray Degreetada sumadeedu tahay JSL/M/WM/222-350/0/012011 ee 31/01/2011 nuxurkeeduna ahaa fulinta mashaariicda ee dawladu dhisanayso ama lagu caawiyo inay fuliso WHG/G & Gadiidka.

Hadaba waxaan madaxda sharfta leh ee qoraalkani ku socdo ka codsanayaa inay dhaqan geliyaan Degreetada Madaxweynaha ee hor ku xusan isla markaana gacan nagu siiyaan ka wasaarad ahaan fulinta hawshaas, isla markaana noo soo gudbisaan baahiyihiina dhisme si aanu idiinku diyaarino naqshadihii iyo dhamaan wixii kale dhismayaashu u baahnaayeen, maadaama WHG/G&Gadiidka hayso aqoontii fulin lahayd hawshaas.

Allah Mahad Leh

Cali Xasan Maxamed
Wasiirka WHG/G/Gadiidka

QAYBTA AFRAAD:

AMARADA & GO'AANADA MAAMUL


JAMHUURIYADA



SOMALILAND

MAXKAMADDA DEGMADA HARGAYSA

Hargeisa District Court



MDH/DML/1949/2015

Hargeysa 10/12/2015

KU:- Idaacadda Radio Hargeysa

Ku;- Dhamaan Warbaahinta Madaxa Banaan

Ku;- Maayirka Caasimadda Hargeysa

Ku;- Agaasimaha Waaxda Dhulka Ee Dacwlada Hoose

Ku;- Taliyaha Saldhiga Booliska G/libaax ee Hargeysa

Ku;- Maayirka Ku Xigeenka Caasimadda Hargeysa

Ku:- Xafiska Garyaqaanka Guud

Ku;- Taliyaha Qaybta Bariga Hargeysa

UJEEDO:- AMAR XAYIRAAD Beer dhaxal ah oo C Cabirkeedu yahay 30.4 Hagtar


Markay Aragatay; - Codsiga ah ay Maxkamadda u soo Qorteen Dhaxlayaasha kala ah 1. **Hooyo Caasha Axmed** 2) **Hibo Maxamed Ciise** kuna codsanayaan in loo xayiro beerta ku taala Degmadda G/libaax beerta Cabirkeedu tahay 30.4 Higtar **Jihooyinkiisuna kala yihiin**

Bari..... Beerta Jaamac A kar.

Koonfur.....Beerta Ciise Axmed

**Waqooyi.....Beerta
Raamaale**

**Galbeed.....Beerta
Macalin.**



Cabirkeedu yahay 30.4 HA

Beertaasi oo ku taala Degmada
G/libaax ee Hargeysa

Markay Aragtey Codsiga Xayiraada ee ku
taariikhaysan 10/12/2015

**Maxkamadu markay Aragtey Xayiraadan waxay u
Cuskatey**

Qodobada kala ah 294 295. 296 XHM

Markay Aragtey: Asbaabta Sare ku xusan iyo
qodobada sharci Ee sare ku xusan dardardar waxay ay
Maxkamadu laga bilaabo manta oo bishu tahay
10/12/2015 Waxay Xayiraad Saartay Beerta ee
sifaheedu sare ku xusan yahay ee ku taala
Degmadda G/libaax ee ay leeyihiin ilma Maxamed
Ciise Beerta lama iibin karo lama Rahmi-karo sifo
kalena looma badali karo ilaa Amar danbe
maxkamadda Ka soo baxayo.

Xayiraadani waa mida Sharciya oo lagu dhaqmaaa
laga bilaamo manta oo taariikhdu tahay
10/12/2015

ALLAA MAHAD LEH

ILYAAS DA, UD IBRAAHIM

(Garsooraha Maxkamada Degmada Hargeysa)

Kaaliye:- C/laahi Axmed Xasan



**JAMHUURIYADA SOMALILAND
MAXKAMADDA DEGMADA HARGAYSA**



Hargeisa District Court

قلمك حومل ا قىل حومل ا

MDH/MDL/958./2015

Hargeysa 12/12/2015

KU:- Idaacadda Radio Hargeysa

Ku;- Dhamaan Warbaahinta Madaxa Banaan

Ku;- Maayirka Caasimadda Hargeysa

Ku;- Taliyaha Saldhiga Booliska Madaarka ee Hargeysa

Ku;- Maayirka Ku Xigeenka Caasimadda Hargeysa

Ku:- Xafisaka Garyaqaanka Guud

Ku;- Taliyaha Qaybta Bariga Hargeysa

UJEEDO :- AMAR XAYIRAAD GURI

Maxkamadda Degmadda Hargeysa

Markay Aragtay; - Codsiga uu Maxkamadda u soo qortay Qareen:

Maxamed Jaamac Cabdi, oo Qareen u ah Dacwoto: Naciima Cabdi Axmed, oo ah caruurta uu Dhalay Maxamed Cali banze hooyadood kuna Taariikhaysan 10/12/2015, Ujeedadiisuna tahay

CODSU XAYIRAAD GURIGA ilma
Cali Banza gurigaasi u ada
YAHAY INTERNATIONAL
HOSPITA



JIHOOYINKIISUNA KALA YIHIIN

Bari...waddo Koonfur... Waddo

Waqooyi... waddo Galbeed... Waddo

Cabirkiisuna yahay 60x70MT.
INTERNATIONAL **hosbitaal**
Gurigaasi oo ku yaala Degmada
M/haybe ee hargeysa guriga waxa
ku jira Dhakhtarka
INTERNATIONAL HOSBITAL ee ay
masaaridu ku jirto

Markay Aragtey; - Codsiga Xayiraada ee ku
taariikhaysan 12/12/2015

Maxkamadu Xayiraadan waxay u Cuskatey
Qodobada kala ah 294 295, 296 XHM

Markay Aragtey: Asbaabta Sare ku xusan iyo
qodobada sharci Ee sare ku xusan dardardar waxay ay
Maxkamadu laga bilaabo manta oo bishu tahay
12/12/2015 Waxay Xayiraad Saartay guriga ay ku
jiraan dhakhtarka international hosbitaal ee
sifaheedu sare ku xusan yahay ee ku yaala
Degmadda M/haybe ee ay leeyihiin ilma cali Baanse
gurigaa Lama iibin karo lama rahmi-karo sifo kalena
looma badali karo ilaa Amar danbe maxkamadda Ka
soo baxayo.

Xayiraadani waa mida Sharciya oo lagu dhaqmaaa
laga bilaamo Manta oo taariikhdu tahay
12/12/2015.

ALLAA MAHAD LEH
ILYAS DA,UD IBRAAHIM
(Garsooraha Maxkamada Degmada Hargeysa)



Kaaliye:- C/laahi Axmed Xasan

JAMHUURIYADA SOMALILAND
MAXKAMADDA RAFCAANKA GOBOLKA MAROODI JEEX
APPEAL COURT OF HARGAYSA

MRGMJ/DMRL/133/2015, _____ 22/12/2015

Ku: - Taliyaha Saldhiga Booliska M/Haybe =Hargeysa=

Og: - Taliyaha Qaybta Booliska Bariga =Hargeysa=

Og:- Guddoomiyaha Degmada M/Haybe =Hargeysa=

Og:- Garyaqaanka Guud ee Qaranka JSL =Hargeysa=

Og:- Idaacada Radio =Hargeysa=

Og:- Jaraa,idka Madaxa Banaan

Og:- Rafcaanlayaal:- Xaliimo Shide Odowaa

Ugaaso Shide Odowaa

Caasha Shide Odowaa

Og:- Rafcaansanayaal:- 1. Maxamed Caqli Shide

2. Abiib Caqli Shide

UJEEDO XAYIRAAD BEER CABIRKEEDU DHAN YAHAY
33 BLOOG

Maxkamada Rafcaanka gobolka Maroodi jeex Hargaysa.



Markay Aragtay: Gal dacwadeedka madaniga ah ee sumadiisu tahay DMRL/133/2015 Rafcaanlayaal ka yihiin.

1. Xaliimo Shide Odowaa.
2. Ugaaso Shide Odowaa.
3. Caasha Shide Odowaa.

Rafcaansanayaalna ka yihiin

1. Maxamed Caqli Shide.
2. Abiib Caqli Shide.

Markay Argtay: Codsiga ku taariikhaysan 19/12/2013 ee uu Maxkamada Rafcaanka u soo gudbiyey

Qareenka rafcaanlayaashu ujeedadiisuna tahay codsi xayiraad beer. Waxaan Maxkamadda sharafta leh halkan uga soo gudbinayaa codsiga ujeeddada ku Sheegan oo waafaqsan Qod: 293, 294, 295, 302, XHM. Sababaha dartood.

1. Rafcaansanayaashu waxay bilaabeen intii qaraarkan laga soo rafcaanqaatay in ay iibiyaan beertii dhaxalka ahayd ee ay ka furnayd

dacwadda maxkamadda Hortaal. Waxay ku talogalsan yihiin in aan waxba gacantooda loogu iman si marka La gaadho wadalahaanshaha ay u waayaan rafcaanlayaashu wax loogu fuliyo Xukunka loo gaadho.

2. Waxay weli wadaan iib, beertan oo ka kooban 33 block oo dhaxal ah lagana dhaxlay Shide Odowaa
3. Waxaa kale oo dhinacaygu cabsi ka qabaan in ay dacwada ku sii cusleeyaan dad kale oo ay iib sharci darro wax kaga iibiyaan.

Sababhaas dartood waxaan si xurmo leh idinka codsanayaa in aad noo xayirtaan beerta oo tilmaamaheedu yihiin:

- ✓ Waqooyi = waxaa ka xiga Beerta ibraahim mooge (dhaga cade)
- ✓ Galbeed = waxaa ka xiga Beerta ilma gaaxuuro.
- ✓ Bari= waxaa ka xiga Beerta Mahdi Buubaa.
- ✓ Koonfur = waxaa ka xiga Beerta ilma Jaamac Faarax 'ildab' iyo ilma Axmed Warsame Jiir.

Markay Aragtay: Qodobada 293,294,295 XHM. Sababahaas dartood maxkamadu waxay soo saartay Xayiraadan.

1. Maxkamada Gobolka Maroodi jeex waxay xayirtay Beerta cabirkeedu dhan yahay 33 block oo ku yaala degmada Maxamuud Haybe gaar ahaan (Uubaale). jahohinkiisuna kala yihiin

- ❖ Waqooyi = waxaa ka xiga Beerta ibraahim mooge (dhaga cade)
- ❖ Galbeed = waxaa ka xiga Beerta ilma gaaxuuro.
- ❖ Bari= waxaa ka xiga Beerta Mahdi Buubaa.
- ❖ Koonfur = waxaa ka xiga Beerta ilma Jaamac Faarax 'ildab' iyo ilma Axmed Warsame Jiir.

Sidaas darteed waxa la idin farayaa in aan dhulkaasi la dhisi Karin, iibin Karin, la hibayn Karin, sifo kalana loo isticmaali Karin, ilaa amar dembe ka soo baxayo Maxkamaddaha.

2. Amarkan xayiraadu wuxuu soo baxday Maanta oo ay Taariikhdu tahay 22/12/2015

Allaa Mahad Leh.

Wadda Shaqayn wacan.

(Maxamed Muuse Daahir)

Garsooraha Maxkamada Rafcaanka Gobolka Maroodi
Jeex

= Hargaysa=

C/casiis Maxamed Muuse

Kaaliyaha Maxkamadda Rafcaanka Gobolka maroodi jeez

**JAMHUURIYADA SOMALILAND
MAXKAMADDA DEGMADA HARGAYSA**



Hargeisa District Court

دەمك حەملا ەىل حەملا

MDH/228/2015

Date: 29/12/15

Ku: - Idaacad Radio Hargaysa

Ku: - Garyaqaanka Guud Ee Qaranka J.S.L

Ku: - Wargeysyada Madaxa Banaan

Og: - Wasaarada Cadaalada Iyo Arimaha Garsoorka

Og: - Wasaarada Hawlaha Guud Ee J.S.L

Og: - Wasaarada Maaliyada Ee J.S.L

Og: - Xisaabiyaha Guud Ee Qaranka JSL

Ujeedo:-Faafin Xukun

Maxkamada Dagmaada Hargaysa.

Markay aragtay;- Xukunka Maxkamada Sare Ee JSL Ka Soo baxay sumadiisuna tahay Tix; MS/411/2015 kuna taariikhaysan 29/11/2015 laguna diiday Asbaabta Racfaanlaha Sakariye Nuur C/laahi ee ku

taariikhaysan 21/09/2015 laguna
ayiday Jawaab Celinta
Rafcaanlayaasha kuna
taariikhaysan 17/04/2015 iyo
Nootayada Sharciga ah
Mohamed- Rashaad Notary Public
Ee Sumadeedu tahay REF;
XNMR-Cd-2041/014

Markay aragtay;- Xukunka Maxkamda Rafcaanka
Gobolka M/Jeex ka soo baxay Ee
sumadiisu tahay
MRGMJ/QMRL/44/2015 kuna
Taariikhaysan 15/09/2015
laguna diiday Asbaabta
Racfaanka Ee Rafcaansane
Sakariye Nuur C/laahi kuna
taariikhaysan 26/08/2015 iyo
Dood afeedka qareenkiisa, laguna
ogolaaday Asbaabta Rafcaanka
Racfaanlayaasha kala ah

1. C/laahi Jaamac Muuse
2. Mustafe Aw Aadan Cabdalle
3. C/laahi X.Ismaaciil Cilmi
4. Ibraahin X. Ismaaciil Cilmi

Sidoo kale lagu ayiday Nootayada SHarciga ah
Mohamed Rashaad Notary Public Ee Sumadeedu
tahay REF;XNMR-Cd-2041/014

Markay aragtay;- Nootayada Sharciga ah ee
magaceedu yahay Mohamed-
Rashaad Notary Public Ee

Sumadeedu tahay REF;XNMR-Cd-2041/014 kuna taariikhaysan 09/12-2014 Ujeedadeeduna tahay Cadayn Rasmiya Oo Sakariye Nuur C/laahi ku cadaynaayo isago masuul ka ah inankiisa Ilyas Zakariye Nuur in shirkada Somaliland ID Card Publisher Company oo leeyahay uu si rasmi ah ugu wareejiyay

1. Som oil Company 50%
2. Abdilaahi H.Ismail Elmi 40%
3. Ibrahim H.Ismail Elmi 10%

Markay aragtay;- qodobada Sharci Ee kala ah Qod;- 102,103,93,276,XHM

Markay aragtay;- Dhamaan Asbaabta Sare Ku xusan iyo qodobada Saharci Ee Sare ku xusan dartood waxay Maxkamadu Halkan ku Faafinaysa Xukunka Maxkamada Sare Ee JSL Ka Soo baxay sumadiisuna tahay Tix;MS/411/2015 Kuna taariikhaysan 29/11/2015 waana sida Hoos ku qoran

Maxkamadda Sare Ee JSL



1. Waxay Diiday Asbaabta Racfaanka Ee Racfaanle Sakariye Nuur C/laahi Ee Ku taariikhaysan 21/09/2015 iyo dood afeedkii qareenkiisa
2. Waxay aqbashay jawaab Celinta Asbaabta Rafcaan Ee Rafcaanlayaasha kor Ku xusan kuna taariikhaysan 17/04/2015 iyo dood afeedkii qareenkooda
3. Waxay ayiday qaraarka Maxkamada Rafaanka Gobolka Maroodi Jeex Ee Sumadiisu tahay MRGMJ/QMRL/44/2015 kuna taariikhaysan 15/09/2015 Iyadoo qaraarisay in Nootayada sumadeedu tahay REF;XNMR-Cd-2041/014 kuna Taariikhaysan 09/12/2014 ay leedahay Dhaqan- gal Sharci
4. Cidii Xaq Kale oo Madani ahi ka Maqan yahay waxa u bannaan in ay Dacwad ka Furato Maxkamadda Awoodda U leh.
5. Qaraarkan waxa loo Cuskaday 144-XM, iyo 77-78-79-80-XHM, iyo Shareecada Islaamka Baabka Asbaab Ka noqoshada ama Fasakhida Heshiiska.
6. Qaraarkani Waxa uu soo baxay Maanta Oo ay Taariikhdu tahay 09/12/2015

7. Waxa Faafintan La soo saray Maanta
29/12/2015 waana mid sharciya oo lagu
dhaqmaayo



Alla Mahad Leh

C/rashiid Maxamed Xirsi Beer-geel
Gudoomiyaha Maxkamada Degmada Hargeysa

Kaaliye Hodan Cabdalle Barre

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**
XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/227/2015.

13/12/2015


Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka
Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran diiwan
Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo jawood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.



Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, **Al-Jawdah Company**, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

Markuu arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, y, Al-Jawdah Company, Astaanteeduna tahay: - (Magaca shirkada oo ku dhex jira goobo khad cas leh, dushana kaga wareegsan yahay khad bulug ah) shaqadeeduna tahay Dejinta Allaabooyinka (Importation), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 13/12/2015

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka



JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/230/2015.

21/12/2015

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, **Lusidle Clearance Transport and Logistic Co**, oo ay

ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

Markuu arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay Lusidle Clearance Transport and Logistic Co, Astaanteeduna tahay:- (Magaca Shirkada) shaqadeeduna tahay bixinta Adeegayadda Socdaalka iyo Logistics- ka (Transport Service and Logistic Service), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 21/1206/2015

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/231/2015.

22/12/2015

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed


Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, **Hanti Jire Accounting Consultancy**, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

Markuu arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.



Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay Hanti Jire Accounting Consultancy: - Astaanteeduna tahay:- (Magaca Shirkada oo Goobo ku dhex jira) shaqadeeduna tahay Bixinta Adeega latalinta xaga xisaabaadka (accounting Consultancy), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 22/12/2015

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/232/2015.

21/12/2015

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha. (Sole Proprietorship)

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, **Deero Electronics**.

Markuu arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay Deero Electronics, Astaanteeduna tahay: - (Sawirka deero, Magaca shirkaduna ku hoos qoran yahay) shaqadeeduna tahay soo dejinta qalabka electronics ah (Import), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 21/12/2015

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka



JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/234/2015.

21/12/2015

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, **PC for General Construction & Engineering Company**, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

Markuu arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay PC for General Construction & Engineering Company, Astaanteeduna tahay: - (magaca Shirkada) shaqadeeduna tahay dhismaha (Construction), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 21/12/2015

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/235/2015.


21/12/2015

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.



Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, **United Consultants for Development (UCD)**, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

Markuu arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay United Consultants for Development (UCD), Astaanteeduna tahay: - (Geed

Weyn), shaqadeeduna tahay bixinta adeega la talinta iyo cilmi baadhista, xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 21/12/2015



Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/236/2015.

27/12/2015

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, **Ashari Doors Company**, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

Markuu arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilaha Shirkaddu u saxeexay, sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay Ashari Doors Company, Astaanteeduna tahay: - (Qalabka Dhismaha) shaqadeeduna tahay soo Dejinta Qalabka Dhismaha (Importer), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 27/12/2015

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka.

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/237/2015.

27/12/2015

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, **Somalibay Plc**, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

Markuu arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka

11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer
Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.



Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay Somalibay Plc, Astaanteeduna tahay:- (Sawir Daruur, magaca Shirkaduna ku dhinac yaalo) shaqadeeduna tahay soo dejinta iyo dhoofinta Allaabooyinka (Import and Export), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 27/12/2015.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA SOMALILAND

XAFIISKA XEER I  **INTA GUUD**

XIG/JSL/238/2015.

27/12/2015

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha. (Sole Proprietorship)

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, Safwa Export Company.

Markuu arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay Safwa Export Company, Astaanteeduna tahay: - (magaca Shirkada oo Goobo ku dhex jira) shaqadeeduna tahay soo dejinta Allaabooyinka (Import), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 27/12/2015

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

